# Hoggaanka Qoysaska iyo Bukaanjiifka Qeybta Infakshanka Murqaha iyo Lafaha

Children's Minnesota, Waaxda Qalliinka Lafaha

**Hoggaanka Qoysaska iyo Bukaanjiifka Qeybta Infakshanka Murqaha iyo Lafaha**

**Children's Minnesota, Waaxda Qalliinka Lafaha**

**Tusmada Qoraalka:**


| | |
|---|---|
| Ku-socoto Bukaanka | 2 |
| Waa maxay Infakshanka Murqaha iyo Lafaha oo Sidee Baa Loo Daaweeyaa? | 3 |
| Baro Xirfadleyaasha | 5 |
| Waxa la Filanayo Inta lagu jiro Isbitaalka | 6 |
| Waxa la filanayo Ka-dib Markaa la aado Guriga | 7 |
| Goormaan Dhakhtarka la soo Xiriirayaa | 8 |
| Su'aalo Iyo Jawaabo | 9 |
| Tasiilaadka iyo Meelaha lala Soo Xiriirayo | 11 |
| Ereyada La Adeegsanayo iyo Qeexid | 12 |
| Su'aalahayga, Welwelkayga, iyo Qoraalladeyda | 13 |

**Ku-socoto Bukaanka iyo Qoysaska**

Ku soo Dhawaada isbitaalka Children’s Minnesota. Intaad isbitaalka joogtaan waxaan rabnaa in aydnaan si kasta wax dhib ah la kulmin. Infakshanka murqaha iyo lafaha waa mid ka mid ah sababta ilmaha loo seexiyo isbitaalka. Waxaan ognahay in ay noqon karto wax aan la hubin oo cabsi leh. Waxaan ku rajo weynahay in uu hoggaankan idinku caawin doono adiga iyo qoyskaaga in aad ku fahamtaan xanuunka, xilalka xirfadleyaasha, macaamilka maalin kasta, iyo daryeelka ilmaha ee inta ay u socoto daaweynta Children's Minnesota.

Qofka ugu horreeya ee daryeelka qeybt ka ah waa waalidka. Waalid ahaan adiga ayaa garanaya sida ugu fiican ee loo daryeeli karo ilmahaaga. Waxaan ku rajo weynahay in aan ka wada shaqeyno sida aan u sameyn karno daryeelka ugu fiican ee suurtogalka ah ee ilmahaaga. Fadlan mar kasta kala xiriir kooxda daryeelka wixii ah su'aalo ama walaac inta aad ku jirtaan isbitaalka.

Qaddarin Badan,

Kooxda Daryeelka Children’s Minnesota

**Waa maxay Infakshanada Murqaha iyo Lafaha (MSK) oo Sidee baa Loo Daaweeyaa?**

Infakshanka murqaha iyo lafaha waa infakshan aafeeya mid ama in ka badan oo ka mid ah habdhisyada murqaha, lafaha, ama kalagoysyada. Noocyada infakshanka ee laga yaabo in ay ilmaha ku dhacaan waxaa ka mid ah:

- Infakshan-lafood (infakshan ku dhaca lafaha)
- Infakshan-murqood (infakshan ku dhaca murqaha)
- Infakshanka-kalagoysyada (infekshan ku dhaca kalagoysyada)

Qiyaastii 1 ka mid ah 5,000 carruur ah ayuu ku dhici karaa infakshanka lafaha ama kalagoysyada inta ay nool yihiin. Marka la ogaado xanuunkaas oo la daweeyo wakhtiga ugu fiican, carruurtu waxay ka helaan natiijo fiican oo noloshooda ayey si caadi ah u sii wataan.

**Maxaa sababa Infakshanka MSK?**

Caadi ahaan, infakshanka lafaha iyo murqaha waxaa sabab u ah bakteeriyo. Sida caamka ah infakshanka waxay jirka ka galaan xididdada qulqulka dhiigga. Inta badan lama garan karo meesha iyo goorta ay jirka soo galayaan. Qaar badan oo ka mid ah bakteeriyadan waxay ku sugan yihiin goobaha deegaanka ah. Siyaabaha infakshankan ku faafo waxaa ka mid ah sida socota:

- Dhaawac toos ah ama qalliin
- Dhiigga in uu gaaro
- In uu ka soo gaaro meelo jirka ah oo uu horay ugu jiray (sida infekshanka lafaha oo ku sii faafa kalagoysyada)

Sababaha ugu badan ee bakteeriyada waa:

- Mesisiliin-fudud *Istaafalokookas ooriyuus* (MSSA)
- Mesisiliin-daran *Istaafalokookas ooriyuus* (MRSA)

**Waa maxay calaamadaha iyo astaamaha infakshanka MSK?**

Calaamadaha iyo astaamaha infakshanka murqaha iyo lafaha ee carruurta ku dhaca badanaa waa ay kala duwanaan karaan. Calaamadaha iyo astaamaha ugu badan waa:

- Xanuun
- Qandho (gaareysa ama ka badan 100.4 oo ah F)
- Dhib ah in aan kalagoys dhaqaaqi karin
- Midabka maqaarka oo isbeddela
- Barar
- Kuleyl ku dhaca goobta infakshanka
- Dhib ah socodka ama inaan culeys la qaadi karin
- Daal badan iyo guud ahaan in aan fayaqab la dareemin

**Sidee baa lagu ogaadaa infakshanka MSK?**

Baaris badan ayaa loo baahan karaa si loo ogaado infakshanka murqaha iyo lafaha. Baarista qaarkeed waa dhiig, qaarna waxay noqon karaan sawirro noocyo kala duwan. Dhakhtarka ayaa laga yaabaa in uu kuu dalbo baarista soo socda:

- MRI
- Uultarasawn
- Raajo
- Baaris sheybaar:
    - Dhiig-qaadis Faahfaahsan
    - Heerka Jileeca Dhiigga (ESR)
    - Dhiig-baaris Xanuun Qarsoon (CRP)
    - Abuurista dhiigga
    - Abuurista dheecaanka
    - Abuurista dheecaan-nabar
    - Baarista difaaca laaym
    - Dhiig-baaris Guud

Qeexidaha baarista fadlan ka eego qeybta ereyada la isticmaalo iyo qeexidahooda.

**Sidee baa loo daaweeyaa infakshanka MSK?**

Infakshannadaas badankooda waxaa lagu daaweeyaa antibiyootig loo isticmaalo noocyada bakteeriyada caamka ah. Antibiyootigga waxaa laga yaabaa in la beddelo inta ilmahaagu joogo isbitaalka haddii bakteeriyada laga heli karo dhiigga, dheecaanka kalagoysyada, ama malax (maal). Antibiyootiga waxaa lagu siinayaa faleebbe. Xaaladaha qaarkood, antibiyootigga ayaa toos looga siin karaa dhiigga ilaa daawada lagu dhammeeyo.

Haddii ilmaha laga qaado saami ah dheecaan, sida nabar ama dareeraha kalagoys infakshan ku jiro, mararka qaarkood waxaa laga yaabaa in la qalo sababtoo ah daawooyinka antibiyootigga ayaa laga yaabaa in ay gaari waayaan infakshanka. Haddii ilmaha la qalayo, waxaa laga yaabaa in laga soo daadiyo dheecaan caabuq ah. Waxaa laga yaabaa in dheecaanka looga soo saaro sariirta dusheeda qalliinka ka dib. Mararka qaarkood infakshan daran awgiis hal qalliin ka badan ayaa loo baahan karaa.

**Baro Xirfadleyaasha**

Intaad isbitaalka joogtaan waxaad la kulmi kartaa shaqaale badan oo kala duwan. Kooxahaas oo dhan waxay daryeelayaan waa ilmaha xanuunsan.

- **Kooxda Daaweynta Guud (Dhakhaatiirta Daaweynta Guud)**: Kooxda daaweynta guud waxay maareeyaan daryeelka guud oo waa kuwa la xiriiraya koox kasta. Waxay ilmaha u dirayaan sheybaarka, dhiig-baarista, oo kooxda ayey kala hadlayaan, oo wixii khibrad dhakhtar guud ah ayey la wadaagayaan.
- **Kooxda Cudurrada Faafa**: Kooxda cudurrada faafa waxaa ka mid ah dhakhaatiirta ku takhasustay cudurrada faafa ee carruurta iyo kalkaaliyeyaal caafimaad oo khibrad u leh cudurrada faafa. Kooxda cudurrada faafa waxay la shaqayn doonaan kooxaha daaweynta guud iyo kuwa lafaha iyo murqaha si loo helo sababaha infakshanka, daawada antibiyootigga, iyo hoggaanka daryeelka. Waxa kale oo ay kooxda u badan tahay in ay maamuli doonto antibiyootigga ilmaha marka guriga la geeyo.
- **Kooxda Lafaha**: Kooxda lafaha waxay ku takhasuseen lafaha, kalagoysyada, iyo murqaha. Kooxda lafaha waxa kale oo ay ku takhasuseen qalliinka oo waxay gacan ka geysan doonaan go'aaminta haddii qalliin loo baahan yahay. Kooxda lafaha badanaa waxa ay sameeyaan daryeelka lagula sii soconayo ilmaha.
- **Kooxda Dabiibka Jimicsiga Jirka (PT)**: Kooxda dabiibka jimicsiga jirka waxa ay gacan ka geysanayaan dhaqdhaqaaqa ilmaha iyo dhaqdhaqaaqidda maalin kasta. Infakshanka MSK dhibaatadiisu muddo gaaban ayey saameyn kartaa dhaqdhaqaaqa iyo sida ay ilmuhu jirkooda u daryeeli karaan. Dabiibeyaasha jimicsiga jirka waxa ay siin doonaan tasiilaad lagu hagaajin karo tayada waxyaabaha la sameeyo maalin kasta sida socodka ama qubeyska.
- **Kooxda Dabiibka Waxqabsiga Jirka (OT)**: Kooxda dabiibka waxqabsiga jirka waxa ay ku caawiyaan ilmaha hawl-maalmeedkooda oo ku adkaan kara infakshanka awgiis. Dabiibeyaasha waxqabsiga jirka waxay bixiyaan tasiilaad hagaajinaya awoodda ilmaha si ay u qabsadaan hawl-maalmeedkooda sida qubeyska, labbiska, ama musqusha.
- **Kooxda Raajada**: Kooxda raajada waxay sameeyaan waaa fasiraadda sawirrada baarista ah sida uultarasawn, MRI, sawirka CT, iyo raajada.
- **Kooxda Raajada Mudista Xididdada**: Kooxdan raajiisteyaasha xididdada waa koox gaar ah oo ah dhakhaatiir u tababaran xididdada oo lagama rabo daaweynta jirka oo furan (sameynta jeexid). Waxa laga yaabaa inay ku lug yeeshaan haddii ay adag tahay in la gaaro dheecaan jirka lagu daadinayo iyada oo la isticmaalayo hab gaar ah.
- **Kooxda Maamulka Kiiska**: Kooxda maamulka kiiska waa kalkaaliyeyaal idinku caawin doona hadafka guud ee marka ikmaha la saarayo, ama aad guriga aadeysaan. Maamulaha kiiska waxa uu hubinayo waa in ilmuhu helo waxa uu u baahan yahay ka hor intaan guriga la geyn. Waxaa ku jiri kara qalabka guriga, kalkaalisada guriga, ama diyaarinta ballamaha la soo noqonayo.
- **Kooxda Adeegga Bulshada**: Adeegyada bulshada ee kiliinigga waa saameynta shakhsiyeed iyo tan bulsho ee baahiyada daryeelka caafimaadka ee qoysku bixiyo. Adeegeyaasha bulshada waxay u caawiyaan bukaanka iyo qoysaska jir ahaan, dareen ahaan, iyo bulsho ahaan wixii welwel ah ee jira inta lagu jiro isbitaalka.

**Waxa la Filanayo Inta lagu jiro Isbitaalka**

Maalin kasta kooxo kala duwan ayaa qaban doona daryeelka "wiisiteyn" – oo waa wakhtiga ay maalin kasta eegi doonaan jawaabaha sheybaarka, waxay wiisiteeyaan ilmaha, oo waxay kala hadli doonaan kooxaha kale qorshaha daryeelka ee ugu fiican. Kooxo kala duwan ayaa ilmaha wiisiteyn doona wakhtiyo kala duwan maalin kasta. Wakhtigaas waa marka aad wax u sheegi karto kooxda daryeelka ee ilmaha. Waalidka ayaa ah kormeeraha ugu fiican ee aad ula socda ilmaha. Fikradahaagu had iyo jeer waa muhiim! Kooxda daaweynta guud ayaa la wadaageysa qoyska warbixinta qorshaha daryeelka.

Waxa dhici karta in ilmaha loo diro sheybaarka (dhiig-qaadis) maalin kasta ah oo lagu ogaan doono xaalka. Marar badan ayaa dhiig laga qaadi karaa ilmaha haddii ay jirto qandho si loo eego bakteeriyada dhiigga ku jirta.

Waxaa laga yaabaa in ilmaha loo qoro dawooyin kala duwan inta ay joogaan. Maalin kasta dalabaadka qoran iyo daawooyinka waxaa eegi doona kalkaaliyeyaasha. Daawooyinka waxaa ku jiri kara antibiyootig iyo daawooyinka xanuunka.

Calaamadaha muhiimka ah, sida heerkulka, cabbirka dhiigkarka, tirada neefsashada, iyo garaaca wadnaha waxaa lagu sameynayaa marar badan si loo hubiyo daawada.

**Waxa la Filanayo Ka-dib Markaa la aado Guriga**

Bixidda ka dib waa in lala socdo (lala kulmo) kooxaha daryeelka oo ay ku jiraan:

- Cudurrada Faafa:
  - Waa in aad ballan la yeelataan kooxda cudurrada faafa si aad loola socdo daawada antibiyootigga
  - Ballanta soo noqoshada ah ee koowaad qiyaastii waa hal usbuuc ka dib marka la baxo
  - Dhiigag ayaa la qaadayaa wakhtiga ballamaha si loola socdo xaalka ilmaha

- Dhakhtarka Lafaha:
  - Haddii qalliin lagu sameeyay ilmaha, ballan lagu hubinayo nabarka meesha la qalay ayaa la idiin qabanayaa
  - Waxaa la idiin tusi doonaa habka dhayidda boogaha markaad ka baxaysaan isbitaalka
  - Kooxda lafaha ayaa arki doona ilmaha markay u dhammaato daawada antibiyootigga. Haddii lafta ilmahaagu ay qeyb ka tahay infakshanka ama daaweynta, kooxda lafaha ayaa laga yaabaa in ay codsadaan in ay la socdaan ilmaha muddo dheer.

## Goormaan Dhakhtarka la soo Xiriirayaa

Sababaha loola soo xiriirayo kooxda cudurrada faafa:

- Qandho ah 100.4 F ama ka badan
    - Haddii aadan guriga ku haysan cabbiraha heerkulka, fadlan kala xiriir kooxdaa si ay kuu siiyaan cabbiraha heerkulka jirka
- Su'aalaha ku saabsan daawada antibiyootigga
- Su'aalaha ku saabsan sheybaarka ka dib marka isbitaalka laga baxo

Sababaha loola soo xiriirayo kooxda lafaha:

- Xanuun ka sii daraya oo aysan daawadu caawin karin
- Inuusan ilmuhu socon karin ama culeys saari karin goobta dhaawaca ama infakshanka
- Malax badan, dheecaan, ama guduudasho ka muuqata faashadda ama dhaawaca
    - Sawir ka qaad si aad u tusto kooxda daryeelka

Kilinigga Cudurrada Faafa ee Children's

Children's Specialty Center
2530 Chicago Avenue South
Suite 410
Minneapolis, MN 55404

Children's Specialty Clinic
347 North Smith Avenue
Garden View Medical Building, Dabaqa 3aad
St. Paul, MN 55102

Taleefanka Xafiiska: 612-813-6777
Kalkaalisada Qaabilaadda Cudurrada Faafa: 651-220-7148 (Isn ilaa Jim, 8-da ilaa 4ta)

Children's Kilinigga Lafaha

Children's Specialty Center
Kilinigga Lafaha
2530 Chicago Avenue South
Suite G070, Dabaqa Hoose
Minneapolis, MN 55404

Taleefanka Xafiiska: 651-220-5700

## Su'aalo iyo Jawaabo

**Maxaa sababay infakshanka ilmahayga?**
Inta badan lama garanayo sida saxda ah ee uu infakshanku ilmahaaga ugu dhacay. Carruurta aad buu ugu dhacaa infakshanka lafaha iyo kalagoyska sababtoo ah waa ay korayaan oo qulqulka dhiigga ayaa aad ugu badan lafahooda iyo jirkooda. Mararka qaarkood dhaawacyada jirka, sida nabar, ayaa ku keeni kara inay bakteeriyadu ka gasho meel dhaawacan.

**Intee in le'eg ayaa ilmahaygu isbitaalka ku jirayaa?**
Muddada joogitaanka cusbitaalka waxa ay ku xirnaan doontaa sida uu u daran yahay infakshanka. Inta badan carruurta uu infakshanku uga dhaco murqaha ayaa caadi ahaan isbitaalka ku jira 1 ilaa 2 toddobaad.

**Miyey u badan tahay in infakshanku iImaha ku dhaco mustaqbalka?**
Mar haddii uu infekshanku ka baxo uma badna inuu ku dhici doono mustaqbalka. Haddii difaaca ilmuhu liito (oo uusan si fudud uga difaaci karin cudurrada), xanuunku waa uu ku soo noqon karaa. Fadlan arrintaas kala hadal kooxda daaweynta.

**Maxaan ilmahayga loo oggleyn in uu cuno ama cabbo habeenkii?**
Infakshanka MSK waa ay adag tahay in la saadaaliyo. Waa in ay caloosha ilmaha maran tahay, waxaa suurtoobeysa in ay si badqabid leh loogu sameeyo qalliin, haddii loo baahdo. Taas macnaheedu ma ah in qalliin lagu sameyn doono. Kooxda ayaa maalintaas ku ogeysiin doona goorta iyo haddii ilmuhu wax cuni karo.

**Muxuusan ilmuhu uga qeybqaadan karin wixii uu sameyn jiray maalin kasta?**
Markuu jiro infakshanka lafta ama kalagoyska, wuxuu daciifinayaa aagga xanuunka. Tusaale, haddii infakshanku ku jiro lafta, meesha uu lafta uga jiro ayaa daciifeysa. Waxay ilmaha ku keeneysaa halis weyn oo ah laf-dillaac, ama lafaha oo jaba. Dhaqdhaqaaqyada loo diidayo ayaa hoos u dhigaya khatarta waxyeello dheeraad ah. Kooxda daryeelka ayaa ku sheegi doonta marka ilmuhu sameyn karo wax kasta.

**Muddo intee ah ayuu ilmuhu u baahan doonaa in uu qaato daawada antibiyootigga ah?**
Caadi ahaan, daawada antibiyootigga ah waxay qaadaneysaa 4 ilaa 6 toddobaad. Wakhtiga ay soconeyso waxay ku xirnaan doontaa sida uu u daran yahay infakshanka.

**Haddii ilmuhu fiicnaado, ma laga joojin karaa daawada antibiyootigga ah?**
Waa in uu ilmuhu waa in uu daawada u qaato sidii loogu qoray. Haddii antibiyootigga goor hore laga joojiyo, infakshanka ayaa ku soo noqon kara ama wuxuu sababi karaa in ay antibiyootiggu mustaqbalka u shaqeyn waayaan.

**Sidee baa lagu ogaan karaa in ilmuhu qaatay daawadii antibiyootigga saxda ahayd?**
Kooxda daryeelka ilmaha ayaa laga yaabaa in ay bakteeriyada ka baaraan dhiigga markay ka qaadaan dhiig ama dheecaanka infakshanka. Haddii la yaqaan nooca bakteeriyada uu ilmuhu qabo, kooxda daryeelka ayaa garaneysa nooca daawada antibiyootiga. Haddii aan bakteeriyada la garan karin, waxaa lagu daaweynayaa iyada oo lagu saleynayo sababaha ugu badan. Waa lala soconayaa ilmaha haddii ay antibiyootigga u shaqeyn weydo iyada oo lagu saleynayo haddii la arko baaris sheybaar oo ah fiicnaansho.

**Miyuu ilmuhu xanuunka sii gudbin karaa?**
Caadi ahaan infakshanka lafta iyo kalagoyska lama kala qaado oo jirka ayey ku jiraan. Haddii uu jiro nabar ama goob la qalay, waa inaan la taaban nabarka oo had iyo jeer la dhaqo gacmaha ka hor iyo ka dib dhayidda ama nadiifinta ama taabashada nabarka. Sidaas ayaa looga hortagi karaa faafinta bakteeriyada markaan si toos ah loo taaban.

**Waa maxay MRSA?**
MRSA (Mesisiliinta-daran *Istaafalikooko ooriyus)* waa nooc gaar ah oo bakteeriya ah oo sababta infakshanka istaaf oo aad u adkaan karta in la daaweeyo sababtoo ah waxay u adkaysataa antibiyootigga qaarkeed. Infakshanka MRSA aad ayey ugu soo badaneysaa bulshada. Haddii ilmahaagu qabo infakshanka MRSA, waxaa laga yaabaa in ay ku jiraan "dadka laga taxadarro", taas oo la macno ah in ay shaqaaluhu xiran karaan qalab ilaalo u ah oo dheeraad ah si ay uga hortagaan faafinta MRSA.

**Waa maxay cudurka Lyme?**
Cudurka Lyme, oo sidoo kale loo yiraahdo *Burellia burgdorferi*, waxaa keenta shillinta deerada. Inta badan lama garan karo goorta ay shillintu dadka gaartay. Cudurka Lyme wuxuu keeni karaa barar ku dhaca kalagoysyada, inta badan jilibka. Cudurka Lyme waxaa lagu daaweeyaa antibayootig.

**Sidee baan guriga ugu daryeelayaa dhaawaca ilmaha?**
Markaad baxeysaan waxaa lagu siinayaa waraaqaha sidaad u daryeeleyso dhaawaca. Fadlan la xiriir kalkaaliyeyaasha haddii aad wax su'aalo ama walaac ka qabto ka hor inta aydnaan guriga aadin.

**Waa maxay qaar ka mid ah dhibaatooyinka infakshanka MSK?**
Inta badan infakshanka MSK ma laha dhibaatooyin socda muddo dheer. Qaar ka mid ah dhibaatooyinka waxay noqon kara kalagoyska, carqalad ah koritaanka, jabniin, ama kalagoyska oo aan shaqeyn karin. Faahfaahinta kala hadal kooxda daryeelka ee infakshanka gaarka ah ee ilmaha.

**Tasiilaadka iyo Meelaha lala Soo Xiriirayo**

- **Adeegyada Turjubaanka**: Adeegyada turjubaanka waa adeeg loo hayo bukaanka Children's Minnesota 24ka saac ee maalintii, 7 maalmood ee usbuuca. Children's Minnesota waxaa dadka loogu hayaa adeegyo turjubaan oo ah luuqado badan oo ah lacag la'aan si bukaanka iyo qoysaska loogu caawiyo afkooda hooyo. Fadlan nagala soo xiriir 612-813-7600 si aad turjubaan u codsato.
- **Adeegaha Bulshada**: Saacadaha shaqada ee caadiga ah (Isniin ilaa Jimco, 8da ilaa 4:30 galabnimo), waxaad si toos ah ugala soo xiriiri kartaa waaxda adeegga bulshada 612-813-6138 (Minneapolis) ama waxaad weydiisaan kalkaalisada, dhakhtarka, ama shaqaalaha kale ee daryeelka in ay kuugu yeeraan adeegaha bulshada.
- **Qaansheegadka**
    - Lacagaha isbitaalka: 952-992-5650
    - Lacagaha kilinigga: 952-992-5640

<u>Isbitaalka Weyn Children's Minnesota</u>

2525 Chicago Avenue South
Minneapolis, MN 55404
Taleefanka xafiiska: 612-813-6000, Leynka Guud

<u>Kilinigga Cudurrada Faafa ee Children's</u>

Children's Specialty Center
2530 Chicago Avenue South
Suite 410
Minneapolis, MN 55404

Children's Specialty Clinic
347 North Smith Avenue
Garden View Medical Building, Dabaqa 3aad
St. Paul, MN 55102

Taleefanka Xafiiska: 612-813-6777
Kalkaalisada Qaabilaadda Cudurrada Faafa: 651-220-7148 (Isn ilaa Jim, 8-da ilaa 4ta)

<u>Children's Kilinigga Lafaha</u>

Children's Specialty Center
Kilinigga Lafaha
2530 Chicago Avenue South
Suite G070, Dabaqa Hoose
Minneapolis, MN 55404

Taleefanka Xafiiska: 651-220-5700

**Ereyada La Adeegsanayo iyo Qeexid**

- **Abscess (Malax)**: waa dheecaanka caabuqa, malax isku ururtay.
- **Acute (Xanuun Degdeg ah)**: xanuun ama calaamad si lama filaan ah u bilowda ama socda muddo yar.
- **Antibiotics (Antabiyootig)**: daawo joojisa koritaanka ama disha jeermis yaryar sida bakteeriyada.
- **Arthrocentesis (Dheecaan-saarid)**: hab daaweyn ah oo dheecaan laga soo saaro kalagoys iyada oo la adeegsanayo cirbad.
- **Bacteremia (Bakteeriyada Dhiigga)**: bakteeriyo dhiigga ku jirta.
- **Bursa (Kiishaka Jilibka)**: kiish yar, oo ah sibiibax oo uu dheecaan ku jiro oo ah u dhexeysa jilibka laftiisa iyo xuubab jilicsan oo ka hooseeya.
- **Bursitis (Caabuqa Jilibka)**: infakshan ku dhaca kiishka jilibka ka hooseeya.
- **Cellulitis (Hurgunka Maqaarka)**: infakshan ku dhaca maqaarka iyo xuubka jilicsan ee ka hooseeya.
- **Chronic (Wate)**: wate ah, sida xanuun ama calaamado, iska socda muddo dheer.
- **Computerized Tomography Scan (Sawirka CT ama CAT)**: nooc sawir-qaadis ah oo la isticmaalo kambuyuutar iyo mishiin raajo wareeganaya si loo helo muuqaalka jirka.
- **Cultures (Abuurid)**: in meel la dhigo unugyo jirka laga soo qaado si loola socdo sida ay noqdaan.
- **Hematogenous (Dhiig)**: waxa loola jeedaa dhiigga.
- **Intravenous (Faleebbe ama IV)**: faleebbe ama in xidid wax lagu shubo ama laga qaado.
- **Magnetic Resonance Imaging (Sawirka MRI)**: Baaris sawir-qaadis ah sawirrada saddex-geesoodka ah ee unugyada jirka ah iyadoo la adeegsanayo birlab weyn iyo shucaac.
- **Myositis (Caabuqa Murqaha)**: infakshan ku dhaca murqaha.
- **Nothing per oral (Soomid ama NPO)**: in aan waxba la cunin oo aan la cabbin si ay calooshu u marato.
- **Osteomyelitis (Infakshanka Lafaha)**: infakshan ku dhaca lafaha.
- **Peripherally Inserted Central Catheter (Tuubbo-gelinta Xididka Weyn ama PICC line)**: Caag dhuuban oo la mid ah xididka weyn ee halbowlaha ah (IV), laakiin ka dheer IV caadi ah oo gaareyss ilaa xididka u dhow wadnaha. Qeyb ah PICC line ayaa jirka bannaanka ka taallaa, badanaaba laabatada xusulka.
- **Physis (Isku-xirka Laba-lafood)**: walax cinjir ah oo kala saaraya dhammaadka lafta labada madax, oo waa qeybta koritaanka lafaha dhaadheer, oo waxaa la yiraahda saxanka koritaanka.
- **Septic Arthritis (Infakshanka Kalagoyska)**: infekshan ku dhaca kalagoysyada.
- **Subperiosteal abscess (Malaxda Gudaha)**: malax ku ururta meel bannaan oo u dhaxaysa lakabka sare ee lafta iyo lakabka gudaha.
- **Ultrasound (Uultarasawn)**: farsamo wax lagu ogaado oo la adeegsata mowjado sameeya muuqaallada xubnaha iyo qeybo ka mid ah unugyada.
- **X-ray (Raajo)**: waa baaris degdeg ah oo aan xanuun lahayn oo soo saarta sawir ah gudaha jirka, oo inta badan lagu arko lafaha.

**Su'aalahayga, Welwelkayga, iyo Qoraalladeyda**